

# AFRIKA

## Fursad maalgashi iyo faa'iidooyin muuqda

**Saciid Cali Shire**

Meesha 10 sano ka hor joornaalka "The Economist" uu Afrika ku tilmaamay "**qaaraddii aan mustaqbalka lahayn**", horraankii sannadkaan wuxuu ku tilmaamay "**xiddig soo baxaysa**". Asbaabta ugu weyn ee keentay in Afrika lagu tilmaamo xiddig soo baxaysana, waa koboca dhaqaale ee ay samaysay 10-kii sano ee la soo dhaafay. Qof kasta oo fiiriya tirakoobyada dhaqaalaha wuxuu arkayaa in Afrika, intii ka dambaysay 2000, ay ahayd qaaradda labaad ee ugu koboca fiican caalamka - Aasiya oo kaliya ayaaba ka horraysay. Kobocaas dhaqaale, Afrika inteeda badan, waxaa ka horreeyey ama dhinac socday isbeddello la taaban karo oo laga sameeyey dhinacyada: dawlad-wanaagga, la dagaallanka musuq-maasuqa iyo dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha. Awoodda wax iibsiga shacabka (purchasing power) oo iyana si aad ah sare ugu kacday, ayaa gacan weyn ka geysatay kobocaas. Kobocaas dhaqaalaha iyo isbeddelladaasi waxay Afrika ka dhigeen qaarad si aad ah ay isha ugu hayaan sharikaadka iyo dawladaha caalamka oo dhammi. Meesha sharikaadka waddammada kale ay: daraasado cilmiyaysan, la talin iyo garab istaag buuxa ka helaan hey'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee waddammadooda, mararka qaarkoodna ayba qayb ka tahay istaraatiijiyada horumar ee waddankaas, Soomaalida, oo muddadaas Afrika koboca dhaqaale samaynaysay, ka dhex muuqday sayladaha ganacsiga, qaybna ka ahaa asbaabaha keenay koboca, ayaan iyagu wax garab istaag ah oo isugu jira cilmi baarisyo, la-talin, macluumaad iyo xogo saldhig u noqda go'aammo qayb ka noqda koboca iyo faa'iidada ganacsigooda aan cidna ka helin. Xog la'aantaas dabartay ganacsigooda waxaaba u weheliya dhibaatooyin isugu jira: dhac, dil iyo xad-gudubyo loo geysto naftooda iyo maalkooda. Qoraalkan kooban, oo muuqaalka kooban ka bixinayaa guud ahaan suuqa ganacsiga ee Afrika, gaar ahaan macluumaadka iyo xogaha mudan in sida gaarka ah isha loogu hayo, ujeeddadiisu waa in uu qofka Soomaaliyeed ee raba in uu ganacsi ka yagleelo Afrika ku qalabeeyo garasho iyo xog saldhig u noqota go'aammo gaarsiiya himilooyinkiisa ganacsi iyo nololeed.

In kastoo, alaabta ceeriin oo kheyraadka dabiiciga ahi ugu horreeyo ay weli qayb weyn ka yihiin dhaqaalaha Afrika, haddana, 10-kii sano ee la soo dhaafay 45% koboca dhaqaale ee Afrika waxa uu ka imaanayey dhinaca macaamiisha. Waxaaba muuqata, in markii u horraysay taariikhda, macaammiisha Afrika ay kharash gareeyan lacag ka badan midda ay kharash gareeyaan macaamiisha Hindiya iyo Ruushka. Meesha, 2010-kii macaamiisha Afrika kharash gareeyeen lacago gaaraya $600 bilyan, sida ay saadaalinayso Hey'adda Lacagaha Adduunka (IMF), lacagahaasi sannadka 2020-ka waxay madaxa la dhaafi doonaan $1.5 triliyan. 45% lacagtaasna waxaa dadku u isticmaali doonaan dharka, cuntada iyo waxyaabaha kale ee daruuriyaadka ah. In kasta oo awoodda gadashada macaamiishu si aad ah sare ugu kacay Afrika oo dhan, haddana, kobocaas xooggiisu, 81%, waxa uu ku koobnaan doonaa 10 waddan (aljeeriya, Angoola, Masar, Gaana, Kenya, Marooko, Nigeeriya, Koonfur Afrika, Suudaan iyo Tuuniisiya).

Asbaabaha keenay kobocaas, in kastoo ay fara badan yihiin, haddana waxaan ka tilmaami karnaa: (1) koboca dadka ee Afrika oo aad uga sarreeya kan caalamka intiisa kale; (2) dadka Afrika oo u badan dhalinyaro; (3) dakhliga oo si aad ah sare ugu kici doona; iyo (4) dadka oo badidoodu ku urursanaan doona magaalooyinka waaweyn.

Haddaan fiirino dhinaca koboca, 2030-ka, 40% koboca dadka ee caalamku wuxuu ka imaan doonaa Afrika. Dhinaca da'da, sida tira koobyadu muujiyeen, 50% dadka Afrika waa dhalinyaro da'doodu ka yar tahay 20 sano. Sidoo kale, marka loo fiiriyo waddammada kale, waxaa aad u badan dadka da'doodu u dhexeyso 16-34 sano. Dhinaca dakhliga, in kastoo dadka dakhligoodu ka sarreeyo $20,000 ay weli aad u yar yihiin (ka yar yihiin 2%), haddana, daraasad ay McKinsey (2012) samaysay ayaa muujisay in sannadka 2020-ka ay 130 milyan oo qoys dakhligoodu si aad ah uga sarrrayn doono inta hadda soo gasha. Dhinaca magaalo ku noolaanshaha, Afrika way ka horraysaa Hindiya. Tusaale ahaan, meesha 40% dadka reer Afrika ay ku nool yihiin magaalooyin, Hindiya, wax ka yar 30% ayaa ku nool magaalo. Waxaa sidoo kale si aad ah sare ugu kici doona magaalooyinka dadka ku nooli ka sarreeyaan hal milyan oo qof. Tusaale ahaan, meesha 2011-kii ay 52 magaalo dadkoodu ka badnaa hal milyan, 2016-ka, ama shan sano gudohood, magaalooyinka ay ku nool yihiin dad ka badan hal milyan oo qof waxay noqon doonaan 65 magaalo, 2030-kana wax ka badan 100 magaalo oo ku yaalla Afrika ayaa dadka ku nooli ka badan doonaan hal milyan oo qof magaaladiiba.

Daraasado dhowr ah oo dhowaan lagu sameeyey hab-dhaqanka macaamiisha Afrika ayaa muujiyey in: Dhalinyarada da'doodu u dhexayso 16-34, ku nool magaalooyinka, dakhligooduna meel dhexaadka yahay ay go'aankooda gadashada ku saleeyaan tayada iyo magaca (brand). Daraasadahaasi waxay muujiyeen in 72% dhalinyaradaas tayada la xiriiriyaan magaca; dhallinyaradu si aad ah u isticmaalaan internet-ka, siiba marka ay raadinayaan macluumaadka waxa ay gadanayaan; wax ka badan 70% ay xisaabi uga furan tahay bangiyada, kayd fiicanna dhigtaan.

Marka la fiiriyo koboca dadka, siiba koboca dhalinyarada; koboca dakhliga soo gala dadka; ku urursanaanta magaalooyinka; isticmaalka tiknoolojiyada siiba internetka iyo telefoonka gacanta; iyo isticmaalka bangiyada, waxaa si fiican u muuqanaysa in macaamiisha Afrika ay yihiin suuq dihin oo fursad maalgashi leh. Si, sharikaadka Soomaalidu uga faa'iidaystaan suuqaan ballaaran oo dihin waxaa muhiim ah:

1. Meeshii, sida hadda muuqata, ay ganacsatada Soomaalidu ku mashquuli lahaayeen tulooyin yar-yar oo naftooda iyo maalkoodaba khatar gelinaysa iyo ganacsiyo yar-yar oo aan wax weyn ku kala duwanayn, waa in ay, awooddooda isugu geeyaan meesha macaamiisha awooda wax iibsiga lihi ku nool yihiin, i.e. magaalooyinka waaweyn. Waxaa muhiim ah in lagu baraarugo in, 13% dadka reer Afrika ay ku nool yihiin 50 magaalo. Waxaa jira 5 magaalo aad u waaweyn oo middiiba ay ku nool yihiin dad ka badan 7 milyan oo qof. Magaalooyinkaas waxaa ka mid ah: Qaahira, Johannesberg iyo Lagos. Waxaa sidoo kale jira kontomeeyo magaalo oo middiiba dadkeedu ka badan yahay hal milyan oo qof. Waxaa sidoo kale jira sideed iskaashi ganacsi (trade blocks) oo haddaad hal waddan gashid aad alaabtaada si fudud ku geyn kartid waddammada kale.
2. Meeshii aad ganacsigaaga ku salayn lahayd, alaab aad dibedda ka soo waariday (import), waxaa muhiim ah, in haddii aad awoodid aad adigoo ka faa'iidaysanaya kheyraadka dhex ceegaaga waddammadaas, aad saylada keentid alaab laga soo saaray, lagu sameeyey, lalana xiriiriyo waddammadaas. Waxaa sidoo kale muhiim ah meeshii aad badeecad sharikaad kale leeyihiin aad magac iyo maamuus u samayn lahayd in aad adigu hadda magac u samayso badeecaddaada, i.e. in aad yagleesho magac cusub, badeecad cusub iyo nidaamkii aad ku gaarsiin lahayd macaamiisha.
3. In kastoo sidaan soo sheegnay tayada iyo magacu muhiim u yahay macaamiisha Afrikaanka ah, haddana, waxaa muhiim ah in, si badeecaddaadu u soo jiidato dadka dakhligoodu dhex-dhexaadka yahay, in sicirku noqdo mid dadku awoodaan.

4. In aad ku baraarugsan tahay in dhalinyaradu yihiin awoodda dhaqaale ee maanta iyo mustaqbalka labadaba. Waxaa sidoo kale muhiim ah in aad ku baraarugsan tahay in dhalinyaradu marka loo fiiriyo dadka waaweyn ay fududahay in badeecad la gaarsiiyo iyadoo loo sii marayo tiknoolojiyada ay ku xiran yihiin, sida internetka iyo telefoonka gacanta.
5. Ugu dambayn, waxaa muhiim ah in waddan kasta aad u aragtid saylad goonidiisa u taagan oo Afrika oo dhan aadan u arkin hal saylad. Ku baraarugsanow in Afrika ay ka kooban tahay 54 waddan, looga hadlo wax ka badan 2000 oo luuqadood, dadkuna leeyihiin dhaqammo iyo caadooyin aad u kala durugsan. Sidoo kale ku baraarugsanow in farqi weyni u dhexeeyo heerka dakhliga, heerka koboca dhaqaale, siyaasadda, ganacasiga, xuquuqaha dadka ajnabiga ah, dulqaadka dadka ka diinta ah iyo furfurnaanta.

Gabagabadii, waxaan leeyahay, Afrika, haddii beri lagu naanaysi jirey qaaraddii faqriga iyo gaajada, maanta waa qaarad leh fursado maalgashi; haddii beri lala xiriirin jirey musuqmaasuq, dagaal, iyo bur-bur mujtamac, in kastoo weli khatarahaas wax ka sii muuqdaan, haddana, maanta waxay safka hore kaga jirtaa taxanaha dawlad wanaagga iyo la dagaallanka musuq-maasuqa; haddii beri lala xiriirin jirey badeecooyin ceeriin, maanta waa suuq fursad maalgashi iyo faa'iidooyin muuqdaba leh. Afrika, inkastoo ay marka loo fiiriyo baaxadda dhaqaalaha caalamka ay aad u yar tahay (wax ka yar 3%), haddana, maanta, waa meesha loogu hadal haynta badan yahay. Tusaale ahaan, 50 shirkadood oo ka mid ah 500 ee shirkadood ee ugu waaweyn caalamka ayaaba mar hore maalgashi la taaban karo ku sameeyey. Haddaba, dadkeennu, meesha ay suuqaas maanta ka ganacsadaan intiisa lama degaanka ah, ha arkeen, ha ku baraarugeen, indhahana ha ku kala qaadeen intiisa cagaarka ah, hana ogaadeen in Afrika tahay xiddid soo baxaysa.



**Saciid Cali Shire**
Waa qoraa, cilmi baare iyo la-taliye. Dhinaca qoraalka, Saciid wuxuu qoray saddexda buug ee: Furaha Ganacsiga, Hoggaamiye iyo Bangiyada Islaamka. Saciid wuxuu sidoo kale soo saara wargeyska Dhambaal. Dhinaca cilmibaarista iyo la talinta, Saciid wuxuu cilmi-baaris iyo la-talin u sameeyaa sharikaadka iyo hey'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn.
**t.** 44 (0) 7838236171 **e.** saidshire@hotmail.com **w.** www.buuh.net

